

KABITAANKA DHAQAALE EE DARYEELKA CARRUURTA

Bixiyayaasha Biilasha iyo Tasmada Lacag
Bixinta Qoyska, Saaxiibka, iyo Deriska/
Guriga-Dhexdiisa/Qaraabada



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES



Mawduucyada

Hordhac	2	Gudbinta Sheegashada Lacag Bixinta	8
Child Care Subsidy Programs (Barnaamijyada Kabitaanka Dhaqaale ee Daryeelka Carruurta, CCSP).....	2	Helitaanka Lacagta.....	9
Barnaamijka Working Connections Child Care (Xiriirinta Shaqada ee Daryeelka Carruurta, WCCC)	2	Baahiyaha Gaarka ah ee Heerka Daryeelka Carruurta	10
Barnaamijyada Badqabka Carruurta ee Daryeelka Carruurta	2	Heerka 1-aad	10
Service Employees International Union Local (Midowga Adeegga Shaqaalaha Caalamiga Maxalliga ah, SEIU).....	3	Heerka 2-aad	10
Doorka iyo Masuuliyadaha Bixiyaha FFN/ Guriga-Dhexdiisa/Qaraabada.....	3	Khaladaadka Lacag Bixinta.....	10
Masuuliyadaha DCYF	4	Khaladaadka Lacag Bixinta Kayar Inti Larabay ..	10
Masuuliyadaha Qoyska.....	4	Khaladaadka Lacag Bixinta Kabadan Inti Larabay ..	11
Hannaanka Uqalmitaanka Daryeelka Carruurta.....	5	Macluumaadka Canshuurta.....	12
Dabagalka Imaanshaha Maalinlaha ah iyo Sheegashada FFN.....	6	Xadgudubyada Barnaamijka	13
Dabagalka Imaanshaha Maalinlaha ah.....	6	Kheyraadka	13
Sheegashada Saxda ah	6	Macluumaadka Meelaha Lagala Xiriirayo	13
		Macluumaadka Onlaynka.....	14

Hordhac

Hagahan waxa uu bixinayaa macluumaadka kusaabsan lacag bixinta sheegashada kabitaanka dhaqaale ee daryeelka carruurta iyo lacagta bixiyayaasha Family, Friend, and Neighbor (Qoyska, Saaxiibka, iyo Deriska, FFN)/Guriga-Dhexdiisa/Qaraabada. Hagahan waxaa soo saaray oona dhawray Department of Children, Youth & Families (Waaxda Carruurta Dhalinyarada & Qoysaska, DCYF) ee Gobolka Washington. Ka Wac Bixiyaha Leenka 1-800-394-4571 haddii aad ubaahan tahay caawin luuqad kale ah. Turjubaan ayaa lagu soo dari karaa wicitaanka.

Tababarka biilasha kabista dhaqaale ayaa lagu heli karaa adiga waxaana loo baahan yahay ugu yaraan halmar inta ay socdaan Service Employees International Union (Midowga Adeegga Shaqaalaha Caalamiga Maxalliga ah, SEIU) 925 Collective Bargaining Agreement (Heshiiska Gorgortanka Waadajirka ah, CBA) 2021-2023. Waxaad ku heli kartaa si fool-ka-fool ah (Luuqadaha Af-Ingiriis, Isbaanish, ama Af-Soomaali), onlayn (Luuqadaha Af-Ingiriis ama Isbaanish), ama buugga shaqada iskaaga ah (Luuqadaha Af-Ingiriis ama Isbaanish). Waxaad sheegan kartaa lacagta ilaa \$20 kadib marka aad dhammeystirto. Kala soco tababarkaaga diiwaanada imaanshahaaga si aad ugu taageertid sheegashadaada. Baro wax badan oo kusaabsan tababarkan iyo gunnooyinka kale adiga oo SEIU 925 ka wacaya 1-877-734-8673. Waxaad iimayl udiri kartaa bowens@whatcom.edu ama wici kartaa 360-383-3174 si aad isu diiwaangeliso.



Child Care Subsidy Programs (Barnaamijyada Kabitaanka Dhaqaale ee Daryeelka Carruurta, CCSP)

Barnaamijka Working Connections Child Care (Xiriirinta Shaqada ee Daryeelka Carruurta, WCCC)

WCCC waxa ay ka caawisaa qoysaska uqalma inay bixiyaan kharashka daryeelka carruurta si markaa waalidka (waalidiinta) ay ooga qeyb qaadan karaan hawlaha sida shaqada, tababarka, barnaamijyada waxbarashada, iyo Temporary Assistance for Needy Families (Kaalmada Kumeelgaarka ah ee Qoysaska Danyarta, TANF) ee hawlaha macmiilka. Shakhsiyaadka ayaa laga yaabaa in loo oggolaado inay bixiyaan daryeelka carruurta sidi bixiye FFN ahaan oo ayna helaan lacagta loogu talagalay qoysaska uqalma WCCC.

Barnaamijyada Badqabka Carruurta ee Daryeelka Carruurta

Shakhsiyaadka ku qaadanaya adeegyada iyagoo u maraya Waalidka Ilmo-Korinta Loo Shaqaaleysiiyey, Ilaalinta Carruurta, iyo Barnaamijyada Badqabka Carruurta ayaa uqalmi kara in laga caawiyo bixinta adeegyada daryeelka carruurta. Shaqaalaha bulshada ee loo qoondeeyey Badqabka Carruurta ayaa dhammeystiraya uqalmitaanka, oggolaanshaha bixiyaha FFN, iyo oggolaanshaha lacagta. Shakhsiyaadka ayaa loo oggolaan karaa inay bixiyaan daryeelka carruurta sidi bixiye FFN ahaan waxa ayna lacagta ku hoos qaadanayaan Waalidka Ilmo-Korinta Loo Shaqaaleysiiyey, Ilaalinta Carruurta, iyo Barnaamijyada Badqabka Carruurta.



Service Employees International Union Local (Midowga Adeegga Shaqaalaha Caalamiga Maxalliga ah, SEIU)

SEIU Local 925 (SEIU 925) waxa ay matalaan Licensed Family Home (Guriga Qoyska ee shatiga leh, LFH) iyo bixiyayaasha FFN ee lacagaha kabitaanka dhaqaale ku qaadanaya CCSP, Waalidka Ilmo-Korinta Loo Shaqaaleysiiyey, Ilaalinta Carruurta, iyo Barnaamijyada Badqabka Carruurta. Wada xaajoodkii CBA ee u dhaxeeyey SEIU iyo gobolka Washington waxa uu faahfaahinayaa bixinada iyo gunnooyinka loogu talagalay xubnaha SEIU 925. Si aad u ogaato wax kusaabsan gunnooyin gaar ah sida magdhabidda lacagaha kubaxa tababarka iyo waxbarashada, SEIU 925 ka wac 1-877-734-8673.

Oggolaanshaha saxda ah ee kamid noqoshada xubnimada ee midoowga ururka, xubnuhu waxa ay bixiyaan kharashka ururka 2% ee adeegyada daryeelka carruurta ee uu gobolku bixiyo. Kharash bixinta waxaa lagu xadidaa ugu badnaan \$50 bishiiba.

CBA waxaa onlaynka laga heli karaa https://ofm.wa.gov/sites/default/files/public/labor/agreements/23-25/nse_childcare.pdf.

Doorka iyo Masuuliyadaha Bixiyaha FFN/Guriga-Dhexdiisa/Qaraabada

Bixiyaha daryeelka carruurta FFN ka ahaan, waxaad door gaar ah la leedahay carruurta kujirta daryeelkaaga. Haddii aad la tahay qaraabo, saaxiib dhaw ama deris, waxaad wali siin kartaa carruurta jawi deegaan oo xasiloon, caafimaad qaba, oo ammaan ah. DCYF waxaa ka go'an in arrintaas ku caawiso iyaga oo u abuuraya qaar ka mid ah doorarka iyo masuuliyadaha aasaasiga ah ee dhammaan bixiyayaasha.

Hagahan waxa uu kaa caawin doonaa inaad fahanto doorarka iyo masuuliyadaha ee loogu talagalay ilaalinta imaanshaha iyo u sheegashagashada lacag bixinta si sax ah. Intaa waxaa dheer, kuwa soo socda waa qaar kamid ah masuuliyadaha muhiimka ah ee ay tahay inaad raacdo:

1. Bixi daryeelka, kormeerka, iyo hawlaha maalinlaha ah ee kusaleysan baahiyaha korniinka carruurta, oo ay kamid yihiin caafimaadka, badbaadada, jirka, nafaqada, dareenka, garaadka, iyo baahiyaha bulsho.
2. Ku bixi daryeelka carruurta goob la oggolaaday; saaxiibada iyo deriska (aan qaraabo la ahayn) waa inay ku bixiyaan daryeelka carruurta guriga ilmaha.
3. Wixi isbedello magaca sharciga, ciwaanka, taleefan lambarka, ama macluumaadka kale ee lagala xariirayo ah ugu soo sheeg DCYF 10 maalmood gudahooda dcyf.ffn@dcyf.wa.gov ama 1-866-482-4325, xulashada 8.

4. U oggolow qoysaska inay la kulmaan carruurtooda marwalba inta ay ku jiraan daryeelka.
5. Ka agdhawow taleefan leh adeegyada wicitaanka degdega ee 9-1-1 oo oggolaanaya labadaba wicitaanada soo galaya iyo kuwa laga dirayaba markasta oo ay carruurta ku jiraan daryeelka.
6. Buuxi shuruucda iyo shuruudaha kabitaanka dhaqaale ee daryeelka carruurta.
7. Xifdi diiwaanada dhammeystiran oo sax ah muddo shan sano ah.

Washington Administrative Code (Xeerka Maamulka Washington, WAC) Waxa uu ka koban yahay sharciyada oggolaanshaha iyo biilasha oo dhammeystiran oo loogu talagalay FFN. Ka eeg WAC 110-15 Xiriirka Shaqada iyo Barnaamijyo Xilliyeedka Kabitaanka Dhaqaale ee Daryeelka Carruurta: apps.leg.wa.gov/WAC/default.aspx?cite=110-15 iyo WAC 110-16 Daryeelka Laga Dhaafay Ruqsada-Bixiyayaasha Qoyska, Saaxiibada, iyo Deriska/Guriga-Dhexdiisa/Qaraabada ee Daryeelka Carruurta: apps.leg.wa.gov/WAC/default.aspx?cite=110-16.

Masuuliyadaha DCYF

- Khabiirka Laga Dhaafay Ruqsada waxa uu kaala shaqeynayaa inuu:
 - Fuliyo shuruudaha hubinta asalka
 - Go'aamiyo oggolaanshaha bilowga ah bixiye FFN ka ahaan
 - La socdo ansixinta socota
- Wuxuu go'aamiyaa oo uu qoraa siyaasadda iyo sharciyada uqalmitaanka CCSP
- Wuxuu maamulaa CBA-da loogu talagalay bixiyayaasha LFH iyo FFN
- Waxaa uu ooga warbixiyaa dawlada federaalka wixi kusaabsan Washington CCSP
- Waxa uu hubiyaa diwaanada imaanshaha iyo biilasha si loo qiimeeyo haddii ay jiraan lacag bixin kabadan ama kayar inti larabay in la bixiyo
- Waxa uu siiyaa qoysaska iyo bixiyayaasha ugu yaraan ogeysiis 10 maalmood oo maalmaha kalendarka ah marki la yareynayo ama la joojinayo gunnooyinka kahor dhammaadka taariikhdi hore ee ogeysiiska Social Service Payment Service (Adeegga Lacag bixinta Adeegga Bulshada, SSPS)
- Waxa uu si toos ah ula shaqeeyaa qoysaska si uu u go'aamiyo uqalmitaankooda adeegyada daryeelka carruurta
- Waxa uu ansixiyaa oo uuna lacagta kabitaanka dhaqaale ee daryeelka carruurta u diraa bixiyayaasha
- Waxa uu ka jawaabaa su'aalaha la xariira uqalmitaanka qoyska, oggolaanshaha, iyo lacag bixinada

Masuuliyadaha Qoyska

Qoyska codsada ama qaata gunnooyinka CCSP waxa uu leeyahay masuuliyadaha ka shuruud ahaan qaadashada gunnooyinkaas. Kuwaan waxaa kamid ah laakiin aanan ku koobneyn:

- Dhammeystiridda hannaanka codsiga iyo soo gudbinta foomamka xaqiijinta lagama maarmaanka ah oo loogu baahan yahay in lagu go'aamiyo uqalmitaanka
- Bixinta ama sameynta qabanqaabada ay ku bixinayaan lacag bixintooda billaha ah
- Diiwaangelinta imaanshaha carruurta uu ku diiwaangeliyo nidaamka imaanshaha ama inuu haysto qof la oggolaaday in uu saxiixo imaanshaha iyo bixitaanka
- Soo sheegidda isbedellada bixiyayaasha shan maalmood gudahooda
- Codsashada daryeel dheeraad ah oo loogu talagalay hawl la oggolaaday





Hannaanka Uqalmitaanka Daryeelka Carruurta

- A. Shakhsigi raba in laga caawiyo lacagta kharashka daryeelka carruurta waxa uu ka codsan karaa:
- Isaga oo Xarunta Lagala Xariiro Kabitaanka Dhaqaale ee Daryeelka Carruurta ee DCYF ee gobolka oo dhan ah ka wacaya 1-844-626-8687
 - Isaga oo la xariirayo shaqaalaha bulshada ee loo xilsaaray Badqabka Carruurta
 - Isaga oo codsiga onlaynka ka dhammeystiraya <https://www.washingtonconnection.org/home/>
- B. DCYF waxay ururisaa oo dib u eegtaa macluumaadka si ay u go'aamiso u qalmitaanka qoyska.
- C. Marki uqalmitaanka loo go'aamiyo CCSP, qoysasku waxa ay warqad ka helaan DCYF. Warqada uqalmitaanka waxaa kamid ah bilowga iyo dhammaadka taariikhaha uqalmitaanka iyo qadarka kharashka ee bishii la bixinayo.
- D. Qoysaska uqalma waxa ay isticmaali karaan jawaabta taleefanka (1-844-626-8687) si ay u hubiyaan codsiga daryeelka canugooda iyaga oo riixaya 1 kadib marka ay wacaan Xarunta Lagala Xariiro CCSP. Qoysaska waxa ay ubaahnaa doonaan lambarka aqoonsiga macmiilkooda ama Social Security Number (Lambarka Amniga Bulshada) waxa ayna hubin karaan:
- In codsigoodi la oggolaaday, in la diiday ama wali go'aan la sugayo
 - Xaalada ay ku sugan yihiin dukumiintiyada ay heshay DCYF
 - Taariikhaha bilowga iyo dhammaadka uqalmitaanka
 - Adeegyada daryeelka carruurta ee la oggolaaday
 - Cadada kharashka la bixinayo bishiiba
- E. Bixiyayaasha waxa ay sidoo kale ka hubin karaan xaalada uu marayo codsiga qoyska iyaga oo isticmaalaya Working Connections Information Phone (Taleefanka Xogta Xiriirka Shaqada, WCIP) (1-866-218-3244). WCIP waxaa lagu heli karaa 24 saac maalin kasta, toddobo maalmood asbuuciiba luuqadaha Af-Ingiriis iyo Isbaanish. Si aad u isticmaasho WCIP, waxaad ubaahnaa doontaa:
- Lambarkaaga bixiyaha daryeelka carruurta SSPS
 - Employee Identification Number (Lambarka Aqoonsiga Shaqaalaha, EIN)
 - Lambarka codsiga qoyska oo laga helo ogeysiiska SSPS
- Sababo la xariiro qarsoodi ahaanta, qaar kamid ah macluumaadka ayaa laga yaabaa inaad heli karin adiga. WCIP waxa ay kuu oggoshahay inaad hubiso kuwa soo socdo:
- Xaalada uu marayo codsiga – la oggolaaday, la diiday, la sugayo, la xiray, ama kujiro liiska sugitaanka
 - Taariikhaha dhaqangalka adeegga
 - Adeegyada la oggolaaday ee daryeelka carruurta
 - Cadada kharashka qoysku bixinayo bishiiba
 - Wixi farriimo gaar ah oo la xariira barnaamijyada kabitaanka dhaqaale
- F. DCYF waxa ay u soodirtaa qoysaska baakadka dib-u-codsiga kahor inta aysan dhammaan muddada uqalmitaanka. DCYF ma bixin doonto kharashka daryeelki la bixiyo marki la dhaafu muddada uqalmitaanka ilaa qoyska loo go'aamiyo inuu uqalmo. Qoyska ayaa masuul ka ah bixinta kharashaadka adeegyada daryeelka carruurta muddada udhaxeysa uqalmitaanka iyada oo aanan caawin laga heleynin DCYF. Uqalmitaanka daryeelka carruurta dib looma taariikheeyo marki qoysasku dib u codsadaan kadib taariikhda dhammaadka muddada uqalmitaanka.

Dabagalka Imaanshaha Maalinlaha ah iyo Sheegashada FFN

Bixiyaha FFN ka ahaan, waxaa lagu oggolaaday qadar lacag bixn saacadle ah iyo tiro saacado cayiman bilkasta oo loogu talagalay canug kasta oo uqalma ee kujira daryeelka. Qiimaha saacadiiba gobolka waa isku mid dhammaan carruurta. Si aad u aragto qiimayaasha saacadiiba FFN ee gobolka, u tixraac CBA https://ofm.wa.gov/sites/default/files/public/labor/agreements/23-25/nse_childcare.pdf.

Waxaad tixraaci kartaa xeerarka WAC ee soo socdo iyo marka aad sheeganeyso lacag bixin:

- 110-15-0034: <https://apps.leg.wa.gov/WAC/default.aspx?cite=110-15-0034>
- 110-16-0015: <https://apps.leg.wa.gov/WAC/default.aspx?cite=110-15-0015>

Si aad u codsato oo aadna uhesho cadada saxda ah bilkasta, waa inaad raacdaa xeerarka iyo hababka hoose.

Dabagalka Imaanshaha Maalinlaha ah

Waa inaad isticmaashaa Electronic Attendance System (Nidaamka Imaanshaha Elektarooniga ah) ay bixiso DCYF ama isticmaashaa nidaamka imaanshaha elektarooniga oo qolo saddexaad leedahay oo ay oggolaatay DCYF. Marka la isticmaalayo nidaamka imaanshaha elektarooniga, qoyska ama qof ay oggolaadeen qoyska, waa in imaanshaha canuga iyo ka bixitaanka bixiyaha daryeelka carruurta lagu diiwaangeliyaa nidaamka imaanshaha elektarooniga ah. Macluumaadka kusaabsan imaanshaha elektarooniga ah waxaa laga heli karaa www.dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/electronic-attendance-system.

Haddii ay oggolaato DCYF in la isticmaalo diiwaanada imaanshaha warqadda ah, qoysasku waa inay saxiixaan canug kasta marka uu imaado iyo marka uu baxo, iyagoo isticmaalaya saxiixa buuxa iyo qoritaanka wakhtiga imaanshaha iyo bixitaanka.

Bixiyayaasha isticmaalaya nidaamka gobolka, waa inaad dhammaan diiwaanada imaanshaha maalinlaha ah kusoo gudbisaan nidaamkiina imaanshaha inta iidaan codsi udirin kahor SSPS ee lacag bixintiina. Macluumaadka kusaabsan isticmaalka nidaamka gobolka, ka eeg nidaamka buugga tilmaamaha <http://www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pdf/EASManual.pdf>.

Sheegashada Saxda ah

DCYF waxa ay soo dirtaa dukumiintiyada soo socdo marka lagu oggolaado lacag bixinta kabitaanka dhaqaale ee daryeelka carruurta:

1. Warqada Oggolaanshaha Bixiyaha, taasoo taxeysa cadada kharashka la bixinayo bishiiba, haddii ay wax jiraan, oo ay kugu leeyihiin qoyska bishiiba
2. Ogeysiiska Adeegga Bulshada
3. Warqada qaan-sheegashada biilka bishiiba ee lagu sheeganayo lacag bixinta
4. Risiidka bishiiba ee lacag bixinta (caddeynta lacag bixinta)

Haddii warqadaha ay ku jiraan wax khaladaad ah, ka wac Bixiyaha DCYF Leenka 1-800-394-4571 si aad u saxdo:

1. Magaca bixiyaha iyo lambarka bixiyaha SSPS
2. Adeegyada la Oggolaaday
3. Magacyada carruurta
4. Tirada halbeegyada (saacadaha) iyo qiimaha sacadiiba ee canug kasta
5. Bilowga iyo dhammaadka taariikhda oggolaanshaha
6. Cadada kharashka qoysku bixinayo bishiiba

Waxaad sidoo kale heli doontaa Ogeysiisyada Adeegga Bulshada marka ay isbedello ku yimaadaan oggolaanshaha ama marka kabitaanada dhaqaalaha canuga ay dhammaadaan. Si aad ogeysiisyada iimayl ugu hesho oggolaanshaha bilowga, isbeddelka, ama dhammaadka taariikahaha, waxaad Leenka Bixiyaha DCYF kala xariiri kartaa 1-800-394-4571 ama iimayl ugu diri kartaa providerhelp@dcyf.wa.gov waxaadna siisaa ciwaan iimayl. Ka baro wax badan oo kusaabsan SSPS www.dcyf.wa.gov/services/ssps.

Biilka qaansheegashada waxaa lagugu soo dirayaa Boostada Mareykanka kahor maalinta udambeysa ee bilkasta. Biilka qaansheegashada u horreysa ee oggolaanshaha cusub waxaa laga yaabaa inaysan imaan ilaa bartamaha bisha soo socota. Waxaad kaloo ka gali kartaa biilka qaansheegashada adiga oo u maraya Bogga Bixiyaha Kusaleysan-Webseedka SSPS.

Marka aad hesho biilka qaansheegashada, dib u eegis kusamee diiwaanada imaanshaha elektarooniga ah si aad u go'aamiso tirada halbeegyada (saacadaha) si aad u sheegato lacag bixinta iyadoo lagu saleynayo imaanshaha iyo oggolaanshaha canuga. Saacadaha iyo adeegyada daryeelka oo aad si sax u sheegan karto waxaa kamid ah kuwa soo socda:

SAACADAHHA DHABTA AH EE DARYEELKA LA SIIYEY CANUG KASTA

Waxaa lagu oggol yahay inaad sheegato lacag bixinta saacadaha dhabta ah ee daryeelka aad siiso canug kasta. Si aad u sheegato lacag bixinta dhabta ah ee saacadaha daryeelka aad bixisay, buuxi sanduuqa kujira biilka qaansheegashada lacagta oo ay ku qoran tahay "halbeegyada" ee canug kasta. U wareeji lambarka ugu dhaw ee tirada idil ah ee dhammaan isugeynta tirada saacadaha daryeelka la bixiyey bishaas. U wareejinta xisaabta lambarka ugu dhaw waa in loo sameeyaa si bille ah, ma ahan si maalinta ah ama toddobaadle. Tusaale ahaan, haddii ay tahay wadarta guud ee bisha 99.5 saacadood, waxaad sheeganaysaa lacag bixinta 100 saacadood.

- Ma sheegan kartid lacag bixin ka badan 16 saacadood oo daryeel ah maalintiiba ee canug kasta
- Ma sheegan kartid lacag bixin wax kabadan lix carruur isku mar ah oo isla saacadaha daryeelka ah
- Ma sheegan kartid lacag bixinta daryeelka aadan dhab ahaan bixinin. Haddii canug ka maqan yahay daryeelkaaga, ma sheegan kartid lacag bixinta saacadahaan
- Ma sheegan kartid lacag bixinta daryeelka taas oo sida caadiga ah ka dhaca goob aanan ahayn halki daryeelka loo oggolaaday inuu ka dhaco. Tusaale ahaan, haddii lagu oggolaaday inaad daryeelka ku bixisid kaliya guriga canuga, kuma bixin kartid daryeelka gurigaaga

SAFARKA BOOQASHADA GOOB/KHARASHKA XOOJINTA TAYADA

Marka aad jeebkaaga ka bixiso kharashka si uu canugaaga ooga qeyb qaato safarka booqashada goob ama hawl xoojinta tayada ah, DCYF ayaa kuu soo celin kara kharashkaaga dhabta ah. Kharash soo celinta waxa ay noqon kartaa ilaa \$30 canug kasta bishiiba, iyada oo aanan loo eegeynin da'da.

Safarka booqashada goob/kharashka xoojinta waxa uu daboolaa waxqabadyo gaarka ah, sida:

- Kharashaadka gelitaanka goobaha sida beeraha xayawaanada, madxafyada, daawashada filimaanta, iyo barkadaha lagu dabaasho

- Barnaamijyada xoojinta iyo casharada socda sida xiisadaha luuqada, jimicsiyada jirdhiska, iyo casharada dabaasha
- Gaadiidka dadweynaha ama lacag soocelinta masaafada maylasha ee qiimaha lacag soo celinta masaafada maylka OFM (waxaa lagaaga baahan karaa inaad bixiso risiid si aad u xaqiijiso kharashaadaadka)
- Qiimaha adeegyada, sida kireysashada madadaaliye, fardo raacitaanka, iyo bandhigyada muusiga
- Iibsashada manhajka ilmaha aanan gaarin dugsi xanaanada carruurta
- Manhajka uu soo saaray bixiyaha oona DCYF oggolaatay

Safarka booqashada goob/kharashka xoojinta ma daboolo:

- Kharashka ama qiimaha soo galitaanka goobta ee dadka waaweyn ee safarka booqashada goobta
- Sahayda iyo agabka loo baahan yahay si loo buuxiyo shuruudaha Ruqsada
- Cuntooyinka la iibsado safarka booqashada goobta

Si aad lacag bixinta si sax ah u sheegato ee lacag soo celinta magdhowga ah ee safarka booqashada goobta ama waxqabadka xoojinta:

1. Sheego qiimaha dhabta ah, oo loo wareejiyey doolarka ugu dhaw marki lacagta dhabta ah ee ku baxday safarka booqashada goobta ama waxqabadka xoojinta ay kayar tahay \$30. Tusaale ahaan, haddii qiimuhu ahaa \$10, geli "10" sanduuqa Halbeegyada Wadarta Guud ee biilka qaansheegashada
2. Ha sheegan lacag bixinta safarka booqashada goobta/kharashka xoojinta haddii canugu uusan ka qeybqaadan. Tusaalahaan, geli "0" sanduuqa Halbeegyada Wadarta Guud ee canugaas ee biilka qaansheegashada
3. Hayso risiidyada muujinaya qiimaha kubaxay safarka booqashada goobta/waxqabadyada xoojinta iyo liiska carruurta kaqeyb gashay
4. Marka ay codsato DCYF, waa inaad kusoo gudbisaa risiidyada 45 maalmood oo kalandarka ah gudahooda ee marka la codsado. Haddii aadan ku bixinin diiwaanada 45 maalmood oo kalandarka ah gudahooda, waxaa laguugu qori karaa in la bixiyey lacag kabadan inti la rabay guud ahaan lacagti aad sheegatay bishaas

Haddii aad dooneyso inaad ku kharashgareyso wax kabadan \$30 canug kasta ee safarka booqashada goobta ama waxqabadyada xoojinta tayada ee bisha dhexdeeda, waxaad weydiisan kartaa qoysaska qaata kabitaanka dhaqaale ee daryeelka carruurta inay bixiyaan kharashka dheeraadka ah. Haddii waalidku doorto inuusan bixin kharashka dheeraadka ah, waxaad go'aansan kartaa inaad u qaadin canuga safarka booqashada goobta ama inuusan canuga ka qeyb qaadan waxqabadka xoojinta tayada. Sanad-maaliyadeed kasta (1-da Luulyo ilaa 30-ka Juun) waxaa jira maalgelin xadidan oo lagu bixiyo safarka booqashada goob/kharashka xoojinta. Haddii lacagta dhammaato kahor dhammaadka sanad-maaliyadeedka, safarka booqashada goobta/kharashka xoojinta qiimeynta mala bixin doono.

KHARASH BIXINTA QOYSKA

Qoysaska badankoodu waa inay sameeyaan kharash bixinta si ay u bixiyaan qeyb kamid ah kharashka daryeelka carruurta ee bishiiba. Qoyska ayaa ka masuul ah inuu ku siiyo adiga kharashka bilkasta. Qoyska ayaa laga yaabaa inuu leeyahay kharash bixin loo qoondeeyey bixiye kale, ama waxaa loo kala qeybin karaa bixiyayaaal dhawr ah. Haddii lagu qoondeeyo lacag bixin, oo aadna helin lacag bixintaas, waa inaad muddo 60 maalmood gudahooda kusoo wargelisaa Leenka Bixiyaha DCYF 1-800-394-4571 ama iimaylka providerhelp@dcyf.wa.gov.

Saacadaha Daryeelka Fasaxa Dugsiga/Waqtiga aan lasii qorsheyn

Saacadahaani waxa ay daboolaan waqtiyada marka ilmaha jira da'da dugsiga aysan joogin dugsiga sida goor hore oo la sii daayo iyo maalmaha dugsigu uusan jirin. Inta lagu jiro sanad-dugsiyeedka, waxaad sheegan kartaa lacag bixin udhaxeysa 35-70 oo Saacadaha Daryeelka Fasaxa Dugsiga ah bilkasta. Inta lagu jiro fasaxa saamarka ee Juun, Juulay iyo Ogoosto, waxaa jira ilaa 115 saacadood oo bilkasta ah. Si aad u sheegato lacag bixinta saacadahaan dheeraadka ah, ku buuxi sanduuqa qaansheegashada biilka Adeegga SSPS ee ay ku qoran tahay "School Holiday Care (Daryeelka Fasaxa Dugsiga)."

FIIRO GAAR AH: *Wadarta guud ee saacadaha daryeelka la sheegay in lagu bixiyo lacagta, oo ay kujiraan saacadaha fasaxa dugsiga, maka badnaan karaan wadarta guud ee saacadaha daryeelka aad bixisay bishaas. Kaliya isticmaal biilka qaansheegashada "School Holiday Care (Daryeelka Fasaxa Dugsiga)" haddii saacadaha daryeelka la bixiyey (oo ay kujiraan saacadaha fasaxa dugsiga) ay ka badan yihiin saacadaha caadiga ee lagu oggol yahay,*

Qoysaska ayaa ka masuul ah inay soo sheegaan haddii ay u baahan yihiin daryeel dheeraad ah oo ka baxsan xiritaanka fasaxa dugsiga.

Bisha	Saacadaha La Oggol Yahay
Janaayo	70
February	35
Maarso	70
Abriil	70
May	35
Juun	115
Juulaay	115
Ogoosto	115
Sebtembar	35
Oktoobar	35
Nofeembar	35
Diseembar	70

SAACADAHAA BAAHIYAHA GAARKA AH

Ka Eeg Qeybta Baahiyaha Gaarka ee bogga 10-aad ee hagahan.

ADEEGYADA HALKA-MAR LA OGGOL YAHAY

Adeegyada halka-mar lagu oggol yahay sida lacag soocelinta tababarka ama waxbarashada ama dhiirigelinta.

Gudbinta Sheegashada Lacag Bixinta

Waxaa jira dhawr siyaabood oo aad ugu gudbin karto DCYF saacadahaaga lacag bixinta. Inta aadan gudbin kahor biilka qaansheegashadaada, buuxi saacadaha daryeelka la siiyey canug kasta ee qaansheegashada, saxiix oo taariikhda ku qor. Waxaa jiri doona tilmaamo laguugu siin doono qaansheegashadaada boostada laguugu soodiray ee xulasho kasta. Waa inaad kusoo gudbisaa saacadaaga lacag bixinta saddex bilood gudahooda laga bilaabo taariikhda qaansheegashada.

Ku gudbi qaansheegashadaada adiga oo isticmaalaya kaliya mid kamid ah xulashooyinka soo socda:

BOOSTO

Koobiga qaansheegashada aad dhammeystirtay boosto ugu dir DCYF:

Washington State Department of Children;
Youth & Families
SSPS
P.O. Box 45812
Olympia, WA 98504-5812

TALEEFOON

Adeegga Invoice Express (Qaansheegashada Degdegga) ka wac 1-888-461-8855. Tilmaamaha sida loo isticmaalo Invoice Express waxaa laga heli karaa www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pubs/EPS_0043.pdf.

BOGGA KUSALEYSAN WEBSEEDKA SSPS

Tilmaamaha kusaabsan sida loo galo oo laga isaga diiwaangeliyo bogga bixiyaha kusaleysan webseedka SSPS waxaa laga heli karaa www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pdf/SSPSPortalRegistration-SAW.pdf.

Waxaa jira saddex qeybood oo waaweyn oo lagu dejinayo gelitaanka:

- Qeybta 1-aad: Ka furo akoon ciwaan Secure Access Washington (Gelitaanka Ammaanka ah ee Wahington, SAW) secureaccess.wa.gov
 - Haddii ay dhibaato kaa haysato dejinta ciwaankaaga SAW, ka wac adeegga macmiilka SAW 24 saac maalintii, toddobo maalmood asbuucii, 1-855-928-3241
- Part 2: Iska Diiwaangeli Bogga Gobta Bixiyaha
- Part 3: Iska Diiwaangeli Laqabsiga Hubinta

Helitaanka Lacagta

Waxaad dooran kartaa inaad kahesho lacagta DCYF iyadoo lagu soo marinayo boosto ama toos laguugu soo shubayo. Dhaqangalaya bisha Juulaay 1, 2019, dhammaan bixiyayaasha cusub waxaa lacagta loogu soo shubayaa si toos ah. Haddii aadan xiriir la lahayn bangi maaliyadeed, waxaad qoraal ku gudbin kartaa codsi tilmaamaya xulashadaada lacag bixinta in boosto ay kuugu soo diraan Adeegga Boostada U.S.

BOOSTO

Sheegashooyinka qaansheegashada la sameeyo inta udhaxeysa 1-da iyo 4:30 p.m. ee 15-ka bisha waxaa boosto laguugu soo diri doonaa 16-ka ama maalinta u horreysa ee shaqada ee ka dambeysa. Haddii 15-ka bisha ay ku aado maalmaha fasaxa asbuuca ama ciid, 4:30 p.m. waxaa loo goynayaa maalinta udambeysay ee shaqada ee ka horreysa 15-ka.

Sheegashooyinka qaansheegashada la gudbiyo wixi ka dambeeyo 4:30 p.m 15-ka bisha ilaa 4:30 p.m maalinta udambeysa bisha ee la shaqeynayo waxaa la bixin doonaa maalinta u horreysa ee la shaqeynayo ee bisha xigta.

Lacagaha lagu bixiyo boostada waxa ay soogalaan Adeegga Boostada U.S. ilaa saddex maalmood oo maalmaha shaqada ah kadib marka la socodsiiyo. DCYF ma dammaanad qaadi karto taariikhda keenista jeegaga lagu soo diro Adeegga Boostada U.S.

Waxaad ka heli kartaa kalandarka tusinaya taariikhaha sheegashada lacag bixinta iyo taariikhaha waarrantiga (jeega) boostada ee ku aadan halkan www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pdf/SSPS-WarrantIssuanceCalendar.pdf.

KUSOO SHUBISTA TOOSKA AH

Sheegashooyinka qaansheegashada loogu soo gudbiyo lacag bixinta kusoo shubista tooska ah waxaa la socodsiiyaa maalinta shaqada ee udambeysa ee bisha qaansheegashada ama taariikhda soo gudbinta, hadho kii dambeeyo. Lacag ku bixinta kusoo shubitaanka tooska ah waxa ay dhacdaa 3-5 maalmood oo maalmaha shaqada ah oo ka dambeeya taariikhda socodsiiinta qaansheegashada.

Akoonka kusoo shubista tooska ah ee cusub ama inaad isbedello kusameeyso akoon horay aad u lahayd, waxaad marka koobaad buuxin kartaa foomamka Diiwaangelinta/W9 ee Kusoo Shubista Tooska elektaroonig ahaan (oo onlayn laga helayo www.dcyf.wa.gov/services/ssps/direct-deposit), kadibna daabac oo boosto ama fakis ugu dir foomamka:

SSPS Provider File Unit
P.O. Box 45812
Olympia, WA 98504
Faakis: 360-902-8268

Ka codso koobiga warqada ee baakada codsiga DSHSSPSWeb@dshs.wa.gov ama adiga oo wacaya 360-664-6161 (Xulashada 1-aad). Xaqiiji inaad u sheegto SSPS inay tahay furashada akoon cusub ama badalida mid hore.

Ma ubaahan tahay in lagaa caawiyo buuxinta foomamka? Ka akhri onlaynka Tilmaamaha Isdiiwaangelinta Kusoo Shubashada Tooska ofm.wa.gov/it-systems/accounting-systems/statewide-vendorpayee-services/vendorpayee-direct-deposit.

Qiimaha Baahiyaha Gaarka ee Daryeelka Carruurta

Qiimaha baahiyaha gaarka waa daryeelka aad siiso canug qaba baahi gaar ah ka sarreeyo oona ka baxsan daryeelka joojtada caadiga ee maalinlaha ah. DCYF lacag kuma bixiso tababarka, hagaajinta dhismayaasha, ama agabka.

Waxaa lagu siin karaa qiimo dheeraad ah ee daryeelka carruurta iyo dadka waaweyn:

- Ilaa da'da 19 sano jir kuwaas oo qaba xaalad la xaqiijiyey oo jirka, maskaxda, dareenka, habdhaqanka ah oo ubaahan daryeel gaar ah oo heer sare ah; ama
- Da'da 13 sano jir ilaa 19 sano oo hoos yimaada kormeer maxkamadeed

Daryeelka carruurta qaba baahiyaha gaarka ah waxaa lagu oggolaaday heerka 1-aad ama heerka 2-aad. Qiimaha baahiyaha gaarka ah waxaa la bixiyaa marka lagu daro qiimaha saacadiiba ee daryeelka carruurta gobolka waxaana qaansheegashada la diraa tirada saacadaha daryeelka loo qorsheeyey.

Heerka 1-aad

Oggolaanshaha heerka 1-aad waxaa loogu talagalay qiimaha baahiyaha gaarka gobolka ee caadiga ah. Kahor inta aanan la oggolaan qiimaha baahiyaha gaarka ee heerka 1-aad, adiga iyo qoysku waa inaad buuxisaan foomka Codsiga Qiimaha Daryeelka Carruurta ee Qaba Baahiyaha Gaarka, laga helayo onlaynka https://www.dcyf.wa.gov/forms?field_number_value=12-001&title=. Foomamka waa in la saxiixaa oo boosto ama fakis loogu diraa DCYF:

Child Care Subsidy Contact Center
P.O. Box 11346
Tacoma, WA 98411-9903
Faakis: 1-877-309-9747

Heerka 2-aad

Qoysku waxa uu la shaqeynayaa adiga iyo DCYF si loo go'aamiyo haddii canugoodu uqalmo qiimaha heerka 2-aad ee baahiyaha gaarka ah. Marka laga yimaado foomamka Codsiga Qiimaha Daryeelka Carruurta ee Qaba Baahiyaha Gaarka, DCYF waa inay ka heshaa cadeyn xaqiijin qoraal ah oo kasocota adeegga caafimaadka, caafimaadka maskaxda, adeegga bulshada, ama xirfadle waxbarasho oo haysta ugu yaraan shahaadada jaamacada heerka mastarka ama kalkaaliso diiwaangashan. Cadeynta xaqiijinta waa inay qeexdaa heerka dheeraadka ah ee daryeelka gaarka ah ee looga baahan yahay goobta daryeelka carruurta ka sarreeya oona kabaxsan waxa aad siin lahayd carruurta aanan qabin baahiyaha gaarka ah.



Wixi macluumaad dheeraad ah oo kusaabsan baahiyaha gaarka, u tixraac Maqaalka CBA 10.5 https://ofm.wa.gov/sites/default/files/public/labor/agreements/23-25/nse_childcare.pdf.

Khaladaadka Lacag Bixinta

Xaddidnaanta waqtiga ee loogu talagalay adiga ama gobolka khaladaadka lacag bixinta oo aad ku raadsataan dib ubixinta lacagta waa:

- Labo sanadood haddii khaladku yahay qiimaha lagu bixiyo da'da ama gobolka. Xaddidkan labada sanadood ah ma khuseeyo xisaab-xirka federaalka, taasoo dib u laaban karta saddex sanadood
- Ilaa saddex sanadood haddii khaladku yahay arrin kale

Khaladaadka Lacag Bixinta Kayar Inti Larabay

Lacag bixinta kayar inti larabay waa ay dhici kartaa khalad kajira qaansheegashadaada darteed, haddii aadan helin lacagta wax kasta oo aad ku sheegatay qaansheegashada ama haddii lagu siiyey qiimo aan sax ahayn. Raac tallaabooyinka hoose:

- Ka hubi qaansheegashadaada diiwaanadaada si aad u aragto haddii magaca canuga uu ka muuqdo qaansheegashada
- Isu barbardhig diiwaanada soo xaadiritaanka iyo qaansheegashadaada si aad u aragto haddii lagu siiyey lacag kayar lagu siiyey
- Wac Leenka Bixiyaha 1-800-394-4571 si aad ugu sheegto in lagu siiyey lacag kayar inti ay ahayd

Si aad u saxdo lacag kayar inti larabay, waa inaad qaansheegashada u gudbisaa gobolka ee adeegyada daryeelka carruurta muddo aanan ka dambeynin saddex bilood kadib marka taariikhda aad gudbisay qaansheegashada. Muranada kusaabsan lacag bixinta kayar inti larabay waa wax laga xumaado. Eeg Tasmada CBA E https://ofm.wa.gov/sites/default/files/public/labor/agreements/21-23/nse_childcare.pdf.

Khaladaadka Lacag Bixinta Kabadan Inti Larabay

In lagu siiyo wax kabadan inta aad heli lahayd waa ay dhici kartaa sababtoo ah:

- Ma isticmaashid nidaamka imaanshaha elektarooniga ah ee DCYF ama ma lihid kadhaafitaan la oggolaaday
- Ma haysatid diiwaanada imaanshaha oo ay iswaafaqayaan diiwaanka sheegashadaada (WAC 110-15-0034)
- Waxaad lacagta ku heshay qiimo khalad ah
- Ma haysatid risiidyada saxda ah oo aad ku taageertid lacag bixinta

Haddii aad ka shakido in lagu siiyey lacag kabadan inta aad u maleyneyso inaad hesho, wac Leenka Bixiyaha 1-800-394-4571 ama iimaylka providerhelp@dcyf.wa.gov. Waxa ay kaa caawin karaan inay xalliyaan khaladka kahor inta DCYF ku dejin lacag bixin kabadan inti larabay oo rasmi ah Office of Financial Recovery (Xafiiska Soo Kabashada Maaliyadeed, OFR).

4. DCYF waxa ay la socotaa lacag bixinta daryeelka carruurta ee wixi khaladaad suuragal ah. Si loo dajiyo haddii khalad uu ansax yahay, DCYF waxa ay dib u eegtaa soo xaadiriitaanka ama waxa ay ku weydiineysaa inaad siiso koobiyo kamid ah diiwaanadaada. Marka ay codsato DCYF, waa inaad kusoo gudbisaa risiidyada 45 maalmood oo kalandarka ah gudahooda ee marka la codasado. Waxaa muhiim ah inaad ka jawaabto wixi codsi ah oo kusaabsan diiwaanadaada imaanshaha. Waxaad la xariiri kartaa waaxda kaa codsaneysa diiwaanada adiga oo tixraacaya macluumaadka lagala xariiro ee kudaabacan codsiyada.
5. Haddii la ogaado in khaladku ansax yahay oona lacag inti la rabay kabadan la dajiyey, waxaad Ogeysiiska Bixinta libiyaha Lacagta Dheeraadka ah ka heli doontaa OFR. Ogeysiiskan waxaa kujira:
 - a. Sababta, nooca lacag bixinta, carruurta ku habboon, iyo muddada lacag bixinta
 - b. Tilmaamaha kusaabsan sida dib loogu bixiyo lacagta dheeraadka ah (qorshayaasha lacag bixinta ee la heli karo)
 - c. Tilmaamaha qeexaya sida looga doodo lacag bixinta dheeraadka ah. Waxaad la xariiri kartaa waaxda dejisay lacagta dheeraadka ah (eeg ogeysiiska lacag bixinta dheeraadka ah ee macluumaadka lagala xiriirayo ee gaar ah) wixi xal suuragal ah, waxaad sidoo kale codsan kartaa Dhageysi maamul si aad ooga doodo lacagta dheeraadka ah. Si aad u codsato dhageysi, waa inaad:

- i. U dirtaa codsiga dhageysiga adiga oo u marinaya boosto bixineysa soo celinta cadeynta helitaanka ama hab kale oo caddeynaya in boostada gaartay OFR.
- ii. Xaqiiji in codsiga dhageysiga uu helay OFR 28 maalmood gudahooda taariikhda aad heshay Ogeysiiska Bixinta libiyaha Lacagta Dheeraadka ah.
- iii. Raaci bayaanka sababta aad ugu maleyneyso lacagta dheeraadka ah inay khalad tahay oona raaci Ogeysiiska Bixinta libiyaha Lacagta Dheeraadka ah. Haddii lacagta dheeraadka ah lagu xallin waayo la hadalka shaqaalaha jooga Leenka Bixiyaha DCYF ama adiga oo u maraya maamulka dhageysiga, waa inaad dib u bixisaa lacagta.

4. Kadib marka laguugu soo diro Ogeysiiska Bixinta libiyaha Lacagta Dheeraadka ah boostada bixineysa cadeynta helitaanka ama adeeg shakhsi, OFR waxa ay bilaabi doontaa tallaabada uruurinta ugu yaraan 30 maalmood kadib. Haddii aad codsato dhageysiga wax kabadan 28 maalmood kadib helitaanka ogeysiiska, tallaabadani ma joogsaneyso inta uu socdo hannaanka dhageysiga.
5. Ogeysiis kasta oo lacag bixinta dheeraadka ah waa dhacdo gooni ah. Haddii aad dooneyso inaad ka doodo, waxaad ubaahnaan doontaa inaad codsato dhageysi gooni ah mid kasta. Waxaa laga yaabaa inaad hesho ogeysiisyo lacag bixin dheeraad ah adiga oo haysto mid ama kabadan oo la sugayo hannaanka dhageysigooda.
6. Muranada kusaabsan lacag bixinta kabadan inti larabay ma ahan wax laga xumaado. Hasayeeshee, waxaad xaq u leedahay inaad codsato dhageysiga maamulka.

Marka aad dib u bixineysa lacag dheeraad ah, waxaa muhiim ah inaad ogeysiiso Miiska Canshuuraha si aad u xaqiijiso inay ka warqabaan oo ayna u sameyn karaan isbedellada lagama maarmaanka ah oo kusaabsan ka warbixinta canshuurta. Ka eeg qeybta Macluumaadka Canshuurta macluumaadka lagala xariirayo.



Macluumaadka Canshuurta

DCYF waxa ay boosto kudirtaa diiwaanka lacag bixinta DCYF oo la yiraahdo Caddeynta Lacag Bixinta. Tani waxaa kujira liiska lacagihi laga jartay oo loo isticmaali karo ujeedooyin canshuureed, oo ay kujiraan wixi lacag bixin ururka ah. Haddii qof ama shirkad ay dooneyso inay xaqiijiyaan dakhligaaga, waxaad siin kartaa caddeynta lacag bixinta. Qaar kamid ah macluumaadka kujira caddeynta lacag bixinta waa kuwo qarsoodi ah mana aha in la shaaciyo. Waxa ay la mid tahay risiidka lacag bixinta.

Haddii aad wax dheeraad ka ah caddeynta lacag bixinta ubaahan tahay, waxaad foomka “caddeynta dakhliga” ka codsan kartaa DCYF. Codsigaada qoraal ahaan ku dir:

Feejignaanta SSPS: Caddeynta Dakhliga

P.O. Box 45812

Olympia, WA 98504-5812

limayl: **SSPSvoe@dshs.wa.gov**

Xaqiijinta Mushaharka ee Faakis: 360-664-6103

W4s: 360-664-5833

DCYF kama jareyso canshuuraha dakhliga lacag bixintaada DCYF. DCYF waxa ay warbixinada dakhliga aad naga hesho gaarsiisaa Internal Revenue Service (Adeegga Dakhliga Gudaha, IRS). Waxaa laga yaabaa inaad hesho foomka W-2 ujeedooyinka canshuurta dakhliga ah dartood. Haddii aad qabto su'aalo kusaabsan canshuurta, fadlan la xariir IRS. Macluumaadka kusaabsan bayaanada canshuurta:

Wac Lambarada Bilaashka ah: 833-725-3502, xulashada 1-aad limaylka: **dcyf.taxreporting@dcyf.wa.gov**

Xadgudubyada Barnaamijka

Sida uu qabo WAC 110-15-0277, bixiyayaashu waxaa waajib ah inay u hoggaansamaan dhammaan masuuliyadaha kujira liiska WAC 110-15-0034, oo ay kamid tahay sheegashada saxda ah. Ku guuldareysiga in sidaas la sameeyo waxaa ka dhalaneysa ku xadgudubka barnaamijka, ganaaxyana waa lagu soo rogi doonaa sida ku qoran WAC 110-15-0279.



Macluumaad dheeraad ah

Macluumaadka Xiriirka

<p>SOO SHEEGIDDA XADGUDUBKA IYO DAYACAADA 1-866-ENDHARM 1-866-363-4276 www.dcyf.wa.gov/safety/report-abuse</p>	<p>JAWAABTA TALEEFANKA QOYSASKA Qoysaska loo oggolaaday WCCC ama SCC waxa ay ka hubin karaan xaalada kiiskooda iyaga oo riixaya 1 kadib marka ay wacaan Xarunta Wicitaanka Adeegga Macaamiisha ee DCYF 1-844-626-8687</p>	<p>QEYBTA HUBINTA TAARIKHDA DCYF 1-866-482-4325, xulashada 4-aad backgroundcheck@dcyf.wa.gov</p>
<p>XARUNTA WICITAANKA ADEEGGA MACAAMIISHA EE DCYF Qoysaska waxa ay codsan karaan adeegyada ama soo sheegi karaan isbedellada 1-844-626-8687 Fakis: 1-877-309-9747</p>	<p>IMAANSHAHA ELEKTARONIGA DCYF 1-844-704-6777 eas.servicedesk@dcyf.wa.gov electronic.attendance@dcyf.wa.gov</p>	<p>QAANSHEEGASHADA DEGDEGA DSHS 1-877-461-8855</p>
<p>ADEEGYADA LAGA DHAAFAY RUQSADA Dhibaatooyinka ama su'aalaha kusaabsan hannaanka oggolaanshaha FFN 1-866-482-4325, xulashada 8-aad dcyf.ffn@dcyf.wa.gov</p>	<p>TAAGEERADA XUBNAHA SEIU 925 1-877-734-8673 DARYEELKA CAAFIMAADKA SEIU 925 1-866-771-7359</p>	<p>ADEEGGA MACAAMIISHA SSPS 360-664-6161 dshs_sspsmail@dshs.wa.gov BOGGA GOOBTA BIXIYAHA SSPS 1-855-928-3241</p>
<p>XAFIISKA KORMEERAHA GUUD EE WAXBARASHADA DADWEYNAHA Waxa uu bixiyaa lacagta maalgelinta federaalka si loogu adeego cuntooyin nafaqo leh iyo iyadoo loo marayo Barnaamijka Cuntada Daryeelka Carruurta 360-725-6206</p>	<p>XAFIISKA SOO KABASHADA MAALIYADA DSHS Economic Services Administration, Office of Financial Recovery, P.O. Box 9501 Olympia, WA 98507-9501 360-664-5700 Wicitaanka Bilaashka ah: 1-800-562-6114 Qoraalka Taleefanka: 1-800-833-6388</p>	



Macluumaadka Onlaynka

- Shuruudaha Ruqsada Guriga Daryeelka Carruurta: www.dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/licensed-provider
- Qiimaha Kabitaanka Dhaqaale ee Daryeelka Carruurta: www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pdf/Subsidy_regions_map_chart.pdf
- Xeerarka iyo Shuruudaha Kabitaanka Dhaqaale ee Daryeelka Carruurta: apps.leg.wa.gov/WAC/default.aspx?cite=110-15
- Macluumaadka Nidaamka Imaanshaha Elektarooniga ah: www.dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/electronic-attendance-system
- Tababarka Nidaamka Imaanshaha Elektarooniga ah: www.dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/electronic-attendance-system/training
- Qoysaska Waxa ay Codsan Karaan: <https://www.washingtonconnection.org/home/>
- Macluumaadka Qaansheegashada Degdegga ah: www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pubs/EPS_0043.pdf
- Ruqsada iyo Xeerarka Kabitaanka Dhaqaale: apps.leg.wa.gov/WAC/default.aspx?cite=110
- Secure Access Washington (Gelitaanka Ammanka ah ee Washington, SAW): <https://secureaccess.wa.gov/myAccess/saw/select.do>
– Goobta Caawinta: <https://secureaccess.wa.gov/public/saw/pub/help.do>
- SEIU 925 CBA: https://ofm.wa.gov/sites/default/files/public/labor/agreements/23-25/nse_childcare.pdf
- Codsiga Qiimaha Baahiyaha Gaarka ah: www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/word/Special_needs_request.docx
- Macluumaadka Tababarka Biilasha Kabitaanka Dhaqaale iyo Jadwalka: www.dcyf.wa.gov/sites/default/files/pdf/Subsidy_Billing_Training_Schedule.pdf

DCYF ma takoorto waxayna usiisaa helitaan siman barnaamijyadeeda iyo adeegyadeeda, dhamaan dadka iyadoon loo tixgalin isirka, midabka, jinsiga, diinta, caqiidada, xaalada guur, dhalashada, rabitaanka galmu, da'ida, xaalad ciidan ama jiritaanka naafo jidheed, dareen ama maskaxeed.

Haddii aad rabto nuqullo dhukumentii ah oo qaab kale ah ama luuqad kale ah, fadlan kala xidhiidh DCYF Constituent Relations (DCYF Xidhiidhada Qaybaha) 1-800-723-4831 ama iimaylka communications@dcyf.wa.gov DCYF PUBLICATION EL_0044 SM (07-2023) Somali